



## ***Eegida-Ilmagaleenka (Hysteroscopy)***

### **Horudhac**

Eegida Ilmagaleenka waa hab u ogolaanaya dadka ku takhasusay aqoonta caafimaadka dumarku inay arkaan ilma galeenka. Hawsha laga qabanayo Ilma-galeenka waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo baaritaan ama daaweyn. Wax ka ogaanshaha ilma galeenka wuxuu qaataa keliya daqiiqada yar mararka qaarkoodna waxaaba lagu sameeya Qaybta Bukaansocodka adoo aan lagu suuxin.

Qalabka lagu eego Ilmagaleenka ee daaweynta xaallada caafimaad qaarkeed waxaa badanaa la sameeya iyadoo qofka la suuxinayo waxaana lagu qabtaa Unuga Qaliin Maalmeedka.

Qalabka lagu eego Ilmagaleenka, oo la mid ah teleskoobka (qalabka meesha fog lagu fiiriyo), ayaa waxaa la gelinayaa afka ilmagaleenka iyadoo la marinayo gudka kaadimareenka. Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa in ilmagaleenka afkiisu u baahan yahay in la soo qabto si loogu keeno meeshuu leeyahay waxaana laga yabaa in la adeegsado daawada wax lagu suuxiyo. Carboon dhaayoksaydh ama dareere ayaa laga yaabaa in la isticmaalo si gooni loogu saaro derbiyada ilmagaleenka sidaas darteed waxaa la arki karaa ilma galeenka gudahiisa. Marka hawsha la qabanayaa dhamaato saamiga laga qaaday xuubka ku dahaaran ilma galeenka afkiisa ayaa laga yaabaa in loo diro baaritaan.

### **Raadinta sababaha baaritaanka-Ilmagaleenka**

#### **Qaarkood**

- Si loo baaro dhalid la'aanta
- Si loo baaro dhiiga caadada oo marka la hellaa kala duwanaato ama aad u badan
- Si loo baaro dhiigabaxa istaagida caadada ka dib
- Si loo baaro dhicinta isku xigxigta
- Si loo hello qalabka IUD (qalabka loo adeegsado iska joojinta ilmaha)

#### **Daaweynta**

- Inloo gooyo ama loo gubo xuubka ku dahaaran ilmasidaha gudahiisa
- In laga soo saaro ilmagaleenka
- In laga soo saaro caddadka yaryar ee ku samaysma ilmagaleenka
- In laga soo saaro qalabka qalafsan ee IUD- da
- si loo gooyo waxyaabaha ka dhasha ilma sidaha dhexdiisa (adhesions)

# A Royal Women's Hospital Well Women's Publication



## Dhibaatooyinka dhaca

Ma jiro qaliin aan khatar lahayn, laakiin khataraha xiriirka la leh qaliinka waa yar yihiin. Khatartu waxay ku badan tahay dumarka sigaarka caba ama miisaankooduna weyn yahay.

Dhibaatooyinka iman karaa waa:

- Dhiigbax
- Dalool ku dhaca derbiga ilmagaleenka
- Infakshan

## Soo ladnaanshaha

Hawshan marka la qabto ka dib astaamaha la arki karo waxaa ku jira:

- Suuxitaan
- Mindhicir xanuunka la dareemo marka caadadu kugu soo socoto
- dhiigbax yar
- Yaqyaqsi, daal ama muruq xannuun
- xanuun garabka dushiisa ah

## Isbitaal ka bixida ka dib

Isbitaalka waxaa badanaa laga baxaa isla maalintaas. Haddii aadan fiicnayn, habeen joog ayaa isbitaal ku qabanqaabin karaa.

Marka dhiig baxo istaago aadna fiicnaato waxaa laga yaabaa inaad bilaabi karto hawshii aad qaban jirtey ama ha ahaato mid gacan laga qabanayo ama hawsha isu galmoodka.

Waxaa lagu samaynayaa ballan aad ku timaado Rugta Caafimaadka Dumarka Bukaansocodka ah (Gynaecology Outpatient Clinic) si aad u awoodo inaad kala hadasho natiijooyinkii baaritaanada sida warbixinta dhiigaga.

Haddii aad u baahan tahay in si dhaqso ah lagu arko waa inaad la xiriirtaa dhakhtarkaaga ama Qaybta Xaalladaha Degdega ah ee Royal Women's Hospital **tel: 9344 2301**.